



kaasi waa shaydaan la dhoho: khinsab, markaad dareento ka cuudu billayso, xaga bidixna saddex jeer candhuuf u tuf

Cusmaan Binu Abil Caas Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey: Nabiga scw ayuu u yimid oo ku yiri: Rasuulka Ilaahayow, shaydaan ayaa nakala dhex galay aniga iyo salaadayda iyo akhriskayga, isaga oo i khal-khalinaaya, wuxuu ku yiri Rasuulku "kaasi waa shaydaan la dhoho: khinsab, markaad dareento ka cuudu billayso, xaga bidixna saddex jeer candhuuf u tuf", wuxuu yiri: sidaasaan sameeyey Ilaahay ayaana iga kaxeeyey.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Cusmaan Binu Abil Caas Allaha ka raali ahaade ayaa u yimid Nabiga scw wuxuuna yiri: Rasuulka Ilaahayow, shaydaan ayaa kala xiray aniga iyo salaadayda, wuxuuna ii diiday inaan ku khushuuco, akhriskaygana wuu iga khal-khaliyey, shakina wuu iga galiyey. Rasuulku scw wuxuu ku yiri: kaasi waa shaydaan la dhoho: khinsab, haduu kuu yimaado eed dareentid Ilaahay ka hoos gal, oo ka acuudu bilayso, xaga bidixdaadna saddex jeer candhuuf yar u tuf, Cusmaan ayaa yiri: waxaan sameeyey sidaa Nabigu scw ii sheegay, ilaahayna wuu iga kexeeyey.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65105>

